# MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA/MAS'UULIYIINTA IYO DHALLINYARADA

Waan Idin Salaanay Waalidiin iyo Mas'uuliyiin,

Iskuulkeenna wuxuu ka-qaybgeli doonnaa Sahanka Dhallinyarada Caafimaadqabka leh (HYS) ee dayrtan. Dhallinyarada Gobolka Washington waxaa ay qaadaneysay HYS tan iyo 2002. Tirada dadka dhallinyarada ah ee qaadanayay sahanka ayaa ka korortay kaliya dhowr kun waxayna gaartey in ka badan 215,000 sanadkii! Sahanku wuxuu weyddiiyaa su'aasha sida ay dhallinyaradu yihiin, xiriirrada bulsho, caafimaadka dhimirka, isticmaalka maandooriyaha, halisaha dhaawaca, iyo kuwo kaloo dheeri ah. Bulshooyinka, degmooyinka, iskuullada, iyo hay'adaha caafimaadka guud ayaa natiijooyinka sahanka u adeegsada in ay ku saleeyaan siyaasadaha iyo barnaamijyada loogu talagalay taageeridda wanaagga dhallinyarada. HYS-ku waa hab macno leh oo loogu talagalay dhallinyarada in ay hagaan mustaqbalka dowlad-gobolkeenna. **Ka-qaybgalka ilmahaaga dhallinyarada ah waa la qaddarinayaa**. ***Fadlan macluumaadkan la wadaag ilmahaaga dhallinyarada ah.*** *Ka-dibna ka hadal sahanka oo go'aami haddii ilmahaaga dhallinyarada ahi uu ka qaybgalayo.*

## Ma u baahan tahay macluumaad badan?

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan ujeeddada sahanka ama habraacyada sahanka, fadlan kala xiriir Baaraha Aasaasiga ah ee Sahanka Dhallinyarada Caafimaadqabta lambarkan (877) HYS-7111 ama email-kan healthy.youth@doh.wa.gov. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Sahanka Dhallinyarada Caafimaadqabta waxaa laga heli karaa: www.AskHYS.net

Guddiga Dib-u-eegista Hay'adeed ee Gobolka Washington wuxuu oggolaadey habraacyada Dhallinyarada Sahanka Caafimaadka qabta ee lagu sharxay waraaqdan. Waxaad halkan ka akhrin kartaa wax badan oo ku saabsan sahanka: www.askhys.net/HYS2025 IRB Requirements

Haddii aad aaminsan tahay in habraacyadan la raacin, fadlan wac 1-800-583-8488. Ma aha in aad ka tagtid magacaaga. Farriimaha oo dhan waa la soo celin doonaa.

## Su'aalaha Soo Noqnoqda

### Su'aasha: Kumaa la weydiin doonaa in uu qaato sahanka?

**Jawaab:** Ardeyda dhigata Fasallada 6aad, 8aad, 10aad, iyo 12aad ee ku dhaqan guud ahaan Gobolka Washington iyo ardeyda dhigata fasallada 7aad, 9aad, iyo 11aad, ee ku jira degmooyinka iskuulka ee yar.

### Su'aasha: Sahanka ma yahay mid ikhtiyaari ah?

**Jawaab:** Haa! Dhallinyarada sahanka qaadaneysa waxaa ay ka gudbi karaan su'aalaha waxayna joojin karaan qaadashada sahanka waqti kasta. Haddii aadan doonaynin ilmahaaga dhallinyarada ah in uu ka qaybgalo sahanka, waxaad waci kartaa iskuulka si looga reebo. Dhallinyarada ayaa sidoo kale macallinkooda u sheegi kara in aysan doonayn in ay sahanka qaataan. Qof walba ee aan sahanka qaadanayn wuxuu ka qaybgeli doonnaa waxqabad kale oo ka duwan, sida in uu wax ku barto ama wax ku akhristo maktabadda. Ma jirto wax ciqaab ah oo uu ardeygu muteysanayo haddii uusan ka qeybgalin sahanka. Darajooyinka ilmahaaga dhallinyarada ah wax saameyn ah kuma yeellan doonno.

### Su'aasha: Waa maxay su'aalaha ku jira sahanka?

**Jawaab:** Su'aalaha sahanka waxaa ay ka yimaadaan sahannada lagu bixiyo guud ahaan qaranka iyo gobolka Washington. Waalidiinta ama mas'uuliyiinta waxaa ay dib ugu eegi karaan su'aalaha halkan: https://www.askhys.net/Resources/Survey Questionnaires.

Mowduucyada qaarkood waxaa ka mid ah:

- Xogta dadka, sida da'da, jinsiga, isirka iyo sinjiga
- Dareennada ku saabsan dugsiga iyo bulshada
- Xiriirrada lala leeyahay waalidiinta, saaxiibada, iyo deriska
- Waxqabadka jireed iyo cunto helidda
- Waxbarasho caafimaad
- Isticmaalka maandooriye
- Habdhaqannada iyo dareennada la xiriira bedqabka iyo tacaddiga
- Aqoonsiga jinsiga[1]
- Dookha galmo (looguma talogalin Fasallada 6aad iyo 7aad)
- Hab-dhaqanka galmada iyo tacaddiga (aan loogu talagalay Fasallada 6aad iyo 7aad)[2]

## Su'aasha: Kumaa heli kara natiijooyinka sahanka?

**Jawaab:** Jawaabaha heerka-shakhsiga waxaa la isugu geeyaa oo lagu soo koobaa warbixinnada iskuullada iyo degmooyinka waxaanna heli kara kormeerayaasha iyo maamulayaasha iskuullada. Degmooyinka Adeegga Waxbarashada (ESD) ee gobolka, degaanka, iyo warbixinnada dowlad-goboleedka ayaa waxaa si guud loogu wadaagaa AskHYS.net.

Xog-ururinta leh jawaabo gaar ah ayaa la heli karaa marka ay codsadaan adeegsadyaasha xogta ee la ansixiyay, sida waaxaha caafimaadka degaanka, iyo cilmi-baareyaal, iyadoo loo marayo habka heshiiska xog wadaagista ee ay maareyso Waaxda Caafimaadka.

## Su'aasha: Sidee loo ilaaliyaa aqoonsiga ka-qaybgalaha?

**Jawaab:** Sir ahaanshaha jawaabaha HYS ee shakhsiga gebi ahaan lama damaannad qaadi karo. Haddii si lama filaan ah ay u dhacdo qof aan oggolaansho haysan in uu arko natiijooyinka sahanka gaarka ah, ka-qaybgalayaasha qaarkood ayaa suuragal ah in la aqoonsado iyada oo la adeegsanayo macluumaadka sida iskuulka, darajada, isirka/sinjiga, iyo aqoonta dibadda.

Haseyeeshee, HYS had iyo jeer waa mid iskaaga ah waxaanna jira tallaabooyin aan qaadno si aan u ilaalino asturnaanta ka-qaybgalaha iyo ilaalinta sirta oo ay ku jiraan:

- Ka-qaybgalayaashu magacyadooda kuma daraan sahanka, mana jiraan koodhadh la ururiyay si loo waafajiyo sahanka ka-qaybgalaha.
- Ka-qaybgalayaasha waxaa ay sahanka ku qaadanayaan madasha sahanka elektarooniga ah iyadoo jawaabaha lagu kaydiyo server-ka ammaanka ah iyadoo geliddu ay xaddidan tahay.

## Su'aasha: Sidee natiijooyinka sahanka loo adeegsadaa?

**Jawaab:** Iskuullada, degmooyinka iskuulka, bulshooyinka iyo hay'adaha caafimaadka dadweynaha ayaa isticmaala natiijooyinka si ay u fahmaan dhallinyarada Washington iyo si loo bixiyo adeegyada ay u baahan yihiin. Natiijooyinka ayaa waxaa loo adeegsadaa qoridda deeqda, barnaamijka iyo qorsheynta siyaasadda iyo qiimeynta, iyo wax kaloo dheeri ah.

Sahanka Dhallinyarada Caafimaadqabka leh ayaa waxaa taabogeliyay hay'adahan dowladda ee soo socda: Maamulka Daryeelka Caafimaadka - Qaybta Caafimaadka Habdhaqanka iyo Soo-kabashada, Waaxda Caafimaadka, Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Guud, iyo Guddiga Khamriga iyo Xashiishadda.

*[1]Kaliya ardeyda fasalka 8aad iyo wixii ka sarreeya ayaa su'aashan heli doonna. Iskuullada doonaya waxaa ay kuddari karaan su'aasha jinsiga ee loogu talagalay ardeyda yaryar ee sahanka fasalka 6aad iyo 7aad .*
*[2]Iskuullada waxaa ay codsan karaan in laga dhaafo weyddiinta su'aalaha hab-dhaqanka galmo iyo tacaddiga galmada.*